

Waraaqda Wararka Xajmiga Shaqada Janitorial



Sebteember 2020


Muqa 2, Nuqulka 6

Xog Uruurinta Culayska Shaqada Shaqaalaha Nadaafada ayaa la qabtay sanaadkan: Waxa nasoo gaadhay 660 jawaabood-shaqaaale nadaafadeed oo Gobolka Washington oo dhan ah ayaa kaga qayb qaataay online ahaan, boosta iyo taleefanka. Way mahadsan yihiin cid walba oo ka qayb qaadataay!

Nuqulka wargeyskan, waxa aanu doonaynaa inaan idinkula wadaagno wax kamid ah natijjooyinka iyo waxyaabaha qaar aad u muuqday ee la isla soo qaaday inay u yihiin muhiim si gaar ah caafimaadkaaga inta aad shaqaynayo wakhtiga safmarka COVID-19.

JAWABAHEENA XOG URUURINTA:

- 660 shaqaale nadaafadeed
- 56% dumar
- Celcelis ahaan da'da: 45 sano
- Xog uruurinta waxaa lagu heli karaa sideed (8) luuqadood
 - Isbaanish iyo Fiitnaamiis ayaa ahaa luuqadaha ugu caansan ee aan Ingiriisi ahayn ee la isticmaalay.
- 29% waxay ahaayeen xubno urur shaqaale



Washington State Department of
Labor & Industries

Si aad macluumaad dheeri ah uga ogaato daraasada,
wac ama fariin qoraal udir ama iimeel udir SHARP
360-819-7908 • 1-888-667-4277 • JanitorStudy@Lni.wa.gov
Nambarka Waxbixinta SHARP: 102-63-2020



Natiijooinka qaar hordhac ah:

- 
- Ku dhawaan 20% shaqaalaha nadaafada ee ka qayb galay xog uruurinteen waxay sheegeen inay shaqada ku dhaawacmeen 12 bilood ee lasoo dhaafay.
 - Waxay tani ka badan tahay inta ay sheegaan shaqaalaha shaqooyinka kale ka shaqeeyaa
 - Shaqaalaha nafaada waxay la sheegey inay ku shaqeeyaan xaalado qalafsan oo aadna u dhakhso badan, oo ayna haysan kiimiko/agab ku filan oo ay shaqada ku fushadaan:
 - 91% waxay sheegeen inay "si aad u dhakhso ah" u shaqeeyaan, mararka qaar ama badanaa
 - 17% waxay sheegeen inayna ku dhawaad weligood, waligood, ama wax ku dhaw "inayna helin wakhti ku filan oo ay shaqada ku dhamaystaan"
 - 18% waxay sheegeen inayna haysan dad ku filan oo shaqada qaban kara badanaa ama maalin kasta
 - 15% waxay sheegeen inay u "badan tahay ama aad u macquul tahay" inay siibtaan, kufaan, ama ay dhacaan inta ay hawlah shaqada caadiga ah ku jiraan
 - "Dhakhsaha" ayaa ah ka ugu badan ee ku keena ee ay sheegaan
 - 33% waxay ku qiimeeyeen tayada agabka ama qalankooda wax "liita" ama "dhexaad ah"
 - 35% waxay sheegeen inay saamayn xun ku yeelatay shaqadoodu (taas oo keenta inay yareeyaan xawaaraha, ama inay shaqada ku adkayso)
 - 14% waxay sheegeen inaan la siinin agab nadiifin oo ku filan oo tayo leh

Natijjooyinkani waxay lamid yihiin xog uruurinta wax ka badan 500 oo shaqaalaha nadaafada Australia lagu sameeyay, halkas oo 91% ay sheegeen inay shaqadood dhakhso tahay, oo 80% ay sheegeen inayna haysan agab ku filan oo nadaafad si ay shaqo tayo leh u qabtaan (United Workers Union, Australia).¹

Waxa aanu si dhaw u eegi doonaa arrimaha bilaha soo socda.

Waxa aanu daraasadayn doonaa natijjada buuxda ee xog uruurinta oo waxa aanu idin siin doonaa macluumaadka ugu danbeeya; waxaanu sidoo kale ku baahan doonaa websaytka [**Xog Uruurinta Culayska Shaqada Shaqaalaha Nadaafada**](#), iyo bayaaminta soo bixitaanka joornaalkeena – [**halkan iska duwaan geli!**](#)

Fadlan ogsoonaw in aanu cusboonaysiinay nidaamkeena tirada - fadlan waxa aad ka tixraacdaa daabacaadii hore ee daabacaada lambarka si aad uga hortagto khalkhalka. Waad ku mahadsan tahay inaad akhrido macluumaadkooda!

¹ [**Xog Uruurinta Shaqaalaha Nadaafada: Malaha Wakhti Fiican oo Ay Shaqada Ku Qabtaan Nadiifinta Inta Ay Shaqaynayaan Wakhtigan Coronavirus; United Workers Union, Australia. Maajo 2020.**](#)